NATIONELLT KVALITETSREGISTER FÖR
ELEVHÄLSANS MEDICINSKA INSATS

## Naga mid noqo oo naga caawi annaga sidii aanu shaqadayada u sii wanaajin lahayn!

Sida ku xusan sharciga dugsiga, waa in adeegyada caafimaadka ee ardaydu (EMI) ay bixiyaan tallaabooyin kor u qaadaya caafimaadka iyo kuwa ka hortagaya intay ardaydu joogaan wakhtiyga dugsiga.

Si loo horumariyo shaqada la xiriirta caafimaadka ardayda si joogto ah, waxaa jira diiwaan tayo Qaran ah oo la yiraahdo EMQ. Ujeeddada diiwaanka tayada ayaa ah in la suurtageliyo horumarin joogto ah oo la abuuro adeeg caafimaad oo uu arday kastaaba si siman u helo, waxaana sidoo kale suurtagal ah in loo adeegsado cilmi baaris.

Xogta caafimaad ee laga helo baaritaannada iyo wadahadalada caafimaadka ayaa lagu ururinayaa diiwaanka tayada. Natiijooyinka caafimaadka ardayda ee la soo ururiyey waxaa lagu arki karaa heer koox ahaaneed oo keliya, taas oo micnaheedu tahay in aan la aqoonsan karin oo ardayda aan si gaar ah loo garan karin.

La hadala kalkaalisada dugsiga haddii aydaan doonayn in laydin geliyo diiwaanka.

Adiga oo ah ardayga iyo/ama qofka mas'uuliyada hay, waxaad xaq u leedahay haddii adiga/ilmahaaga laga diiwaangeliyo diiwaanka tayada. Warbixin dheeraad ah ka akhriso bogga www.kvalitetsregister.se ama si toos ah ula xiriir diiwaanka:

Diiwaanka tayada qaranka ee
waxqabadyada caafimaadka
ardayda
Mejl: registerhallare@emq.nu
Webb: www.emq.nu